FAAFINTA **RASMIGA**

الجريدة الرسمية

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 8-aad Garowe 22, Jenuary, 2008 ***lam 1***

جريدة الشهرية

Faafinta bilwalba soo baxda

Qaybta faafinta rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland

Qiimuhu waa Sh/So. 10,000 Lambar walba. ***Rukunka Sanadkii*** *waa Sh/So. 170,000 dalka gudihiisa, dibadda Sh/So. 500,000* ***Rukunka*** *la weydiisto wakhtiga loo gooyay wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh/So. 3,000* ***Rukunka*** *iyo qoritaanka waxaa la weydiistaa qaybta maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda.*

TUSMADA

Sharci Lr. **1.** ee 22/01/2006, kuna saabsan Siyaasadda Waxbarashada Puntland.

DAWLAD G. PUNTLAND EE SOOMAALIYA
Xafiiska Madaxweynaha

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
Office of the President

Sharci Lr. 1. ee ku saabsan Siyaasadda Waxbarashada Puntland.

MADAXWEYNUHU

MARKUU ARKAY	Qodobka 54-aad (14) farqadiisa 14-aad ee Dastuurka Dawlad Goboleedka Puntland ee Soomaaliya.
MARKUU ARKAY	Muhiimada sharcigani u leeyahay Waxbarashada DGPL ee Soomaaliya.
MARKUU DHEGAYSTAY	Ra'yiga Golaha Xukuumadda a Puntland
MARKUU ARKAY	Ansixinta Golaha Wakiilladu Ansixiyeen sida ku cad Go'aankooda XGGW/DGPL/09/2006, ee 21/01/2006

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda

Qodobka Kowaad

Sharcigan Siyaasadda Waxbarashada Puntland Gollaha Wakiiladu way ansixiyeen

Qodobka Labaad

Nuqulada asalka ah waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, kan Garyaqaanka guud iyo kan Xoghayaha Gollaha Wakiillada..

Qodobka Saddexaad

Sharcigani waxa uu dhaqan-gelayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, markaa ayaa sharciga kamid noqonayaa shuruucda Puntland qof kastana ay waajib ku noqonaysaa inuu dhawro, kuna dhaqmo.

Maxamuud Muuse Xirsi
Madaxweynaha Dawladda Puntland

MASWADADDII 3
(Draft 3)

WARQAD SIYAASADEEDKA WAXBARASHADA PUNTLAND

(WSWP)

Gaabin (Abbreviation)

QWA (BED)	: QAYBTA WAXBARASHADA AASASIGA AH
GWB (CEC)	: GUDDIGA WAXBARASHADA BEESHA
MKIQWMWDH	: MANHAJKA, KORMEERKA IMTIXAANADKA, QAYBTA WAXBARASHADA, MACALIMIINTA IYO WAXBARTIDA DHEERIGA AH
XMB (CFBT)	: XARUNT MACALIMIINTA BIRITISHKA
AG (DG)	AGAASIMAH GUUD
QQMMDHCP (DPARPGI)	: QAYBTA QORSHEYNTA , MAAMULKA, MACHADKA DHEDIG LABOODKA (GINSIGA) IYO CILMIBAARISTA EE PUNTLAND
WWM (DTED)	: WAAXDAWAXBARASHADA MACALIMIINTA
HDHDY (ECD)	: HORMARINTA DHALAANKA DADA YAR
HMWW (EMIS)	: HABKA MAARAYNTA IYO WERGELINTA WAXBARASHADA
GQW (ESC)	: GUDDI QAYBEEDKA WAXBARASHADA
MDT (FDI)	: MAALGELIN DIBADEED TOOS AH
WSSGQ (GNP)	: WAX SOO SAARKA GUUD EE Qaranka
DGP (PRG)	: DOWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND
CTMG (GTTC)	: COLLEGEKA TABARBARKA MACALIMIINTA EE GAROOWE
SAI (ISPs)	: SIIYAHA ADEEGA INTERNETKA (PROVIDERS)
MT (IT)	: MACLUUMAADKA TEKNOLOJIYADA
WW (MOE)	: WASAARADA WAXBARSHADA
WATA (NFE)	: WAXBARASHADA AAN TOOS KA AHAYN
UADA (NGO)	: URUR AAN DOWLI AHAYN
QMQMJC (PARGID)	:QORSHEYNTA, MAAMULKA, QAYBTA MACHADKA JINSIGA IYO CILIMI BARISTA

CBP	(PCC)	: COLLEGKA BEESHA PUNTLAND
GIP	(PEC)	: GUDDIGA IMTIXAANADA PUNTLAND
WSWP	(PEPP)	: WARQAD SIYAASADEEDKA WAXBARASHADA PUNTLAND
MJP	(PGI)	: MACHADKA JINSIGA PUNTLAND
MWWP	((PIE)	: MACAHDKA WAAXDA WAXBARASHADA PUNTLAND
GIDGP	(PREC)	: GUDIGA IMTIXAANADA DOWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND
DGP	(PRG)	: DOWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND
QWAKD	(PPED)	: QAYBTA WAXBARASHADA ASAASIGA KA DIB (POST PRIMARY)
ISHDSP	(PSCE)	: IMTIXAANKA SHAHAADADA DUGSIYADA SARE EE PUNTLAND
IDHIP	(PSLE)	: IMTIXAANKA DHAMEYSTIRKA ISKUULADA PUNTLAN
QWMP	(PTED)	: QAYBTA WAXBARASHADA MACALIMIINTA PUNTLAND
GXDS	(SACB)	: GOLAHA XIRIIRINTA DEEQAHA SOMALIA
FWFXT	(TVET)	: FARSAMADA/WAXBARASHADA FASAXA XILIYEEDKA IYO TABABARADA
BHQM	(UNDP)	: BARNAAMIJKA HORMARINTA EE QARAMADA MADOOBEY
WQMUSDH	(UNESCO-PEER)	: WAXBARASHADA QARAMADA MADOOBEY, URURKA SAYNIDK IYO DHAQANKA BARNAAMIJKA GARGAARKA (GURMADKA) DEGDEGA AH IYO DIB U DHISIDDA
SCQM	(UNICEF)	:SANDUQA (MISAANIYADDA) CARUURTA EE QARAMADA MIDOBEY

Sababeynta hormarinta warqad siyaasadeedka waxbarashada Puntland (XHWSWP)

Hadda aduunku wuxuu aqoonsaday in waxbarashadu ka mid tahay waxyaalaha ugu muhiimsan ee dalka iyo bulshada (Mujtamaca) dib u dhisi karo. Garowsiga fekerkaas awgiis ayey Puntland uga jirtaa diyaarinta siyaasadda lagu hagayo waxbarashada.

Mudadii dheereyd ee dagaalka sokeeye socdey ka dib waxaa gudagelidda dib u dhisidda iyo horumarinta dhaqaalaha; shuruudaha hawlgalka waxbarashada iyo akhriska. Taas oo ah aasaaska dhismaha ee hormarka, gaar ahaan xaqiijinta, tirada, tayada iyo u qalmidda (relevance).
Arrintaas xasaasiga ah ayaa ku baaqaysa tilmaan cad iyo xiriirin. Sidaa darted qaybta waxbarashada waxa ay u baahantahay aragti fog ee horumarin oo dhiseysa qayb muuqata oo siyaasad ahaan kala hormarsan laguna qeexay jihooyinka iyo dib u habeynta qeybaha ku haboon.

Qeybta labaad ee ogolaanaysa waa mid xiriir la leh arrimaha jinsiga iyo u-sinaanta. Haweenka, Dadka laga badan yahay (Minorities) iyo kooxaha tabarta yar oo aan ku heysan Puntland waxbarasho munaasab ah (Tayo leh). Siyaasadda guud ee waxbarasho oo leh dareen jinsi, oo (waafaqsan) habka caalamiga ah sida ku caddeyd shirwaynihii xuquuqada dhalaanka (SXDh) iyo Shirweynihii tirtiridda faquuqida haweenka (Dabargoynta kala soocid kasta oo lid ku ah haweenka) (TFH). Sidaa daraadeed ayaa loo baahday taas oo dalku kutabsaday qaabaynta horumarinta dadka aqoonta leh iyo isbedel ijtimaaci ah. Siyaasada waxbarashadaas kamadan beyntii waxay nagu hogaaminaysaa suulinta dhaqamada kale ee faquuqa haweenka. Kaas oo ka yimaada, (ka soo faafa) mujtamaca guud laakiin ka muuqda (Rebound) ka fula dugsiyada. Sidoo kale siyaasadu waa in ay ahaato mid dareen leh kana turjumaysa ama ka jawabeysa (Respond) xuquuqada iyo baahida dadka laga badan yahay (dadka tirad yar) iyo kooxaha kale ee tabarta yar.

Ugu danbayn, dagaalkii iyo ciribtiisii ayaa abuurtay dhibaatooyinka soo socda: jeesayn koobnaanta iyo u sinnaan la'aanta helidda waxbarashada, oo helitaan la'aanta ugu badan ay heysato reer miyiga iyo gabdhaha; siin waxbarasho aan tayo lahayn;manhaj iskuul oo aan dareen laahyn(an unresponsive schools curriculum); maqnaansho qiyaas iyo xukun (absence of standards an control); maarayn aan habaysnayn iyo qorshayn dhiman; aasaaska maal gelinta oo daciif ah; iyo jiritaanka shuruudo waxbarasho oo tiro badan oo si xun loo xiriiriyey jiritaanka shuruudo badan ee waxbarasho oo xiriirkoodu liito - fiicneyn); sidaa daraadeed waa loo baahanyahay in la helo qaab shaqo oo siyaasad leh si ay uga taageerto Dalka waajihaadda dhibaatooyinkaas ama taxdiidkaas. Marka siyaasadaa la dejiyo oo keliya oo lagu saleeyo tiirarka shaqaynta (functionality) iyo u qalmidda (relevance) waxbarashada ayaa si caqli gal ah siin karta (keeni karta) gaarida (xaqii jinta) ahdafta iyo ujeeddoyinka waddan –umadeed (national goals and objectives).

1.1 Himilada Qaranka (national goals)

Himilada waxbarashada ee Puntland waxaa laga keeney (drive from) (laga soo xawiley) Himilada guud ee Somalia.

Himiladaasi waa:

- In la dhiso Bulsho casri ah oo aasaaskeedu yahay qaanuunka (the rule of law)
- Inuu ka shaqeeyo dhexgalinta iyo ku dhaqanka mabaadiida qiyamka islaamka ee saxa ah
- Samaynta maamul demuqradi ah oo ka soo unkamay rabitaan xor ah oo muuqda oo madaxbanaan.
- In la gaaro heli taan aqoon sare iyo fulinta ee sayniska, tichnolojiyada , cilmiga maareynta iyo xirfadaha horumarinta.

- Ilaalinta iyo dhawrida (foster) xuquuqda aadamiga iyo xorriyadda.
- In la hormarino (promote) cadaaladda iyo midnimo guud ee bulsho.
- Samayn bulsho maskax furan oo ka sameysan shaqsiyaad leh aragti qiimeyn bulshadeed oo sax ah iyo dabeecado ballan qaadaya in ay ilaaliyaan, korna u qaadaan dhaqanka wanaagsan iyo caadaadka islaamka ku saleysan.
- Ilaalinta iyo hormarinta xaaladda beyadda (beyadda dabiiciga ah),si jiilka danbe ay ugu noqoto dhaxalgal wanagsan oo lagu noo laan karo.
- Xaqiijinta in Somalidu noqoto xubin muhiim ah ee beesha caalamka iyo ka qeybgalka kor dhinta hormarka iyo wanagga Aadimga.
- Dhiiri gelinta guud ee helidda aqoonta qorista iyo akhriska, tirsiga iyo xirfad nololeedka.
- Dhiiri gelin iyo in oof kasta uu gaaro awoodiisa wax qabad si uu kor ugu qaado xirfaddiisa si ay dib ugu faa'iideyso bulshada.
- Kor u qaadid dareen masuuliyadeed ee bulshada, oo ku aaddan nabadeynta iyo hormarinta xiriirka Aadamiga heer bulsho, dal iyo mid caalamiba.

1.2. Aragtida fog ee siyaasadda waxbarashada gobolada Puntland.

Geedi socodka ujeedadaas balaaran ee dalka, iyo ahdaafta waxbarashada Puntland waa:

- Ka qayb galka abuuridda bulsho heshiis ku ah kaydinta iyo tayeynta(hormarinta)(kobcinta) dhaqanka iyo caadadka ku salayn mabaad'ida islaamaka sax ah(genuine Islam).
- Dhiirinta helitaanka aqoon wax qorida, akhrinta iyo aqoonta tirade sidoo kale gaaridda aqoon sare iyo ku howlgalka sayniska, tecnolojiyada iyo aqoonta maaraynta iyo xirfadaha.
- Dhiirigelin helitaanka xirfad nololeedka furaha u ah nolosha si loogaarsiiyo hormar buuxa iyo xaqiijinta awoodda waxqabad ee shaqsiyadeed taas oo loola jeedo hormarinta dalka iyo ka qayb galka dhaqaalaha adduunka.
- Kobcinta (foster) fekarka caqli galka ah, go'aan qaadasho adag, **aragti shaqsiyadeed** ah (self expression) iyo iskufilnaasho.
- Kor u qaadidda koritaanka ardayda xooggan, caafimaad qabta, qaan gaar bisil ah, faa'iido leh, oo loo baahanyahay, ahna xubno bulshada la jaanqaadi kara oo leh aragti dabeecad wanaagsan ee xagga jinsiga iyo arrimaha kale ee qoyska.
- Furista albaabada fursadaha iyo koritanka qoyska oo aan loo eegayn, jinsiga, gobol ama diin.
- Ku abuurida maskaxda dhallaanka dareen wadaninimo iyo midnimo barbaarintiisa hore iyo kobcin (enhance) dareenka dal jacaylka guud ahaan Soomali gaar ahaan Puntalad iyo rabitaanka isdhexgalkeeda joogtada ah, deganaan iyo barwaaqo. (as wel as ad desire for its sustained integration, stability and prosperity)
- Xifdisiinta aqoonta, xirfadaha iyo dabeecadaha u suura gelinaya Somalida, ilaalinta iyo hormarinta beyadda si ay ugu gudbiyaan jiilka danbe mid nabad iyo wanag leh (future generation) ee mustaqbalka.
- Kor u qaadidda (promte) helista dabeecada iyo xirfado dadka dhan ka dhigaya in kuwo kasta noqodo mid firfircoon ahna wax ku ool ka tirasan beesha caalamka, kuwaas oo ku soo kordhinaya korid iyo hormar.
- Xifdisiin xirfadaha iyo dabeecadaha u kobcinaya koritaanka dareenka in la helo cadaalad bulsho, masuulinimo, qiimaha iyo wanaagga nabadda.
- Xifdisiin (inculcate) Mahad celinta iyo qadarinta sharafta shaqada oo lagu eegayo(tilmaansanayo) baahida bulshada, dhaqaale iyo beyadda gobolka.

1.3. Shuruudaha Guud

Gobolada Puntland:

- Waxaa ka go'aan ah in mabaad'id waxbarashada lagu fuliyo dhaaman iyadoon ubadka loo eegeyna Jinsi, diin, qabiil ama dabaqad.
- Waa go'aan kor u qaadista helist iyo ku negaynta waxbarashada dhamaan, gaar ahaan gabdhaha iyo danyarta (marginalized populations).
- Waa go'aan mabaad'ida u sadburinta (affirmative action) ee waxbarashada si kor loogu qaado helista (access) Waxbrashada kuwa fursadoodu yartahy ama kuwa tirade yar **(disadvantaged or under representative groups).**

Dowladu waxay aqoonsantahay in waxbarashadu tahay ganacsi ka dhexeeya, bulshada,ururada bulshada dhexdooda, qeyb gaar ah iyo waalidiinta. Sidaa daraadeed dowladu waxy dejinaysaa shuruudo iyo soo jiidasho loogu tala galay dhiirin. In si firfircoon uga qayb glaan kuway **khuseyaan** shuruucdaha(Provision) iyo **bixiyayaasha** waxbarashada.
Dowladu waxy qaadaysaa talaabooyin lagu aqoonsanaayo una adeegaya sahalayana maal gelinta qaybaha khaaska ka ah(hantida gaarka ah) oo Isla markaasna siinaya qaab sharciyeysan oo laga mamaar maan ah oo lagu dhiirigelinayo maalgelintaas (iyo siin qaabab la hagay oo muhiim ah ee lagama maar maanka ah si loogu dhiiri geliyo maal gelintaas.)
Dowladda Puntland sida oo kale waxaa ka go'aan ah in adeega guud laga dhex arko qaybahaan soo socda:

- Waxbaraqshada gabdhaha
- Waxbrashada xirfadaha muhiimka ah(life skils)
- Waxbarashada reer guuraaga iyo kooxaha kale ee tabarta yar.
- Waxbarashada dhalaanka baahida gaarka ah leh

Waxbarashada Gabdhaha (girl's education)

kor u qaadista ka qayb gelinta gabdhaha waxbarashada ayaa mudnaanta koowaad ee Puntland (is a state priority)

Sidaa awgeed dowladdu waxay sii qaadeysaa (puruce) xeeladaha soo socota si ay u xaqiijiso in gabdho badan ka qaybgalaan waxbarashada aasaasiga ah ee Puntland.

- Xoojinta ka war haynta ololayaasha kor u qaadaya, wacyi-gelinta guryaha, bulshada qaybahooda kala duwan,iskuulada iyo goobaha shaqada.
- U ololayn joogta ah oo gaarsiisan qaybta ugu sareysa ee dowladda si loo helo taageero iyo ballanqaad waxqabad oo mudnaan siinaya waxbarashadda gabdhaha.
- Abuurid awood siin bey'ad waxbarasho oo gabdheed, oo lagu xaqiijinaayo helidda qalab haboon oo munaasab ah, sida **musqulo** gaar u ah gabdhaha oo laga dhiso dhammaan **dugsiyada waxbarashada aasaasiga ah.**
- Kor u qaadidda barnaamijyo tababar macaliin oo u diyaarinaya macalimiinta in ay noqdaan kuwa dareen dheeraad ah u leh baahida gabdhaha.
- Dib u eegid manhajka Waxbrashada aasaasiga ah si looga dhigo mid dareen dheeraad ah u leh jinsiga (Gabdhaha).
- Ka saaridda manhajka dugsiyada iyo buugta wax kasta oo leh takoor jinsi iyo aaminsanaan fikaradaha aan saxa ahayn (negative stereotypes.)

- Bud dhigidda iyo fulinta habab (siyaabo) lagu sugayo in dugsiyadu yihiin kuwo gabdhaha siinaya ilaalin dheeraad ah, oo lagu daray kor u qaadista nabadgelyada gabdhaha markay joogaan dugsiyada, markey aadayaan iyo markey ka soo noqonayaan.
- Soo gudbinta/xoojinta barnaamijyo leh maalgelin loogu talo galay gabdhaha ugu baahida badan iyo barnaamijyo caawinaya ku sugnaantooda waxbarashada
- Dhaqan gelinta (enactment) sharci ujeedadiisu tahay ilaalinta maslaxada waxbarashada gabdhaha, laguna joojinayo guursiga gabdhaha aan gaarin xilliga guurka (ban of early marriage)
- Qorista (recruitment) macalimiin badan, maamulayaal iyo saraakiil waxbarasho oo haween ah oo ka hawlgala dhammaan heerar kala duwan ee maamulka waxbrashada si ay ugu noqdaan ku dayasho gabdhaha una siiyaan taageero baahidooda gaarka ah iyo waxay tabanayaan.
- Kor u qaadista ka qayb-galinta haweenka ee maamuladda iyo gudiyada waxbarasho ee heerarka kala duwan sida heer Degmo, Gobol iyo Xarunta dhexe.
- Taageridda habab u ogolaanaya gabdhaha in ay ku noqdaan dugsiyada ka dib markay Waxbrashadu ka kalo go'do waxbarasho oo ay sababtay uur aan lagu talagelin.

Heerka waxbarashada heerka dugsiyada sare, in ay ku biiraan gabdhuhu Dawladdu waxay sidoo kale ay qaadaysaa xeeladaha kor ku xusan si loo dhiira-geliyo dugsiyada sare taas oo leh horumar dhaqan-dhaqale.

Dowladu waxay kale oo taageereysaa ka qaybglaka dhalinyarada reer guuraaga ah, dhalinyarad danyarta ah iyo dhalinyarada baahida gaarka ah leh ee ku jira waxbarashada sare taas oo loo adeegsanayo in waxbarashada sare laga sameeyo deegaamada miyiga, in la siiyo deeq waxbarasho, mid lacageed ardayda u baahan iyo sharci (measures) loo dejiyay in uu kor u qaado ku soo dabaalidda waxbarashada loo badanyahay (main stream education) ardayda leh baahida khaaska ah. Go'aamadaas waxaa la socon doona diyaarinta dugsiyo sare oo leh qalab cayaaro iyadoo tixgalin la siinayo ardeyda iinta leh (with consideration for learners with disabilities) iyo ku darid dugsiyada sare tababaro khaas ah oo leh macalimiin u khaas ah.

Life skills education (waxbarashada xirfad nololeedka)

Iyadoo la siinayo muhiimad xirfad nololeedka, Dowladdu waxay xil iska saari doontaa (hubintooda) in xirfadaha lagu daro manhajka dhammaan maadooyinka waxbarashada aasaasiga ah iyo kuwa dugsiyada sare. Manhajka dugsiyada xirfad nololeedka wuxuu noqon doonaa mid bulshada baahideeda iyo dhanqankeeda waafaqsan isla markaasna leh dareen jinsi ah.

Waxaa bartayaasha loo bandhigi doonaa arrimaha markaas ka taagan ee heer caalmi iyo mid gobolba sida wacyiglintq iyo barashada HIV/AIDS, arrimaha jinsiga, waxbarashada la xiriirta galmada, barashada dhaqanka, ixtiraamidda dadka kale, dabargoynta isticmaalka maandooriyayasha, maareynta beyadda iyo soo guurinta xirfadaha. Xagga waciyi-gelinta iyo wax ka bedalista dabeecadaha, sida loo arko cudurka HIV/ADIS dowladdu waxay hubin doontaa in HIV/AIDS iyo arrimaha kale ee caafimadka taranta lagu daro manhajka maadooyinka lagu takhasuso waqtiga ugu horeeya ee suura galka ah.

Dowladdu waxay taageeri doontaa hagidda (**guidance**) iyo talo siinta ardayda ee xagga muhiimadda qoyska, galmada iyo aririmaha taranka, iyo ku daridda barnjaamijka barashada xirfad-nololeedka oo lagu darayo xirfad nololeedka.

Wasaarada waxbarashadu (WW) sidoo kale waxay taageeri doontaa qaabka iyo fulinta manhajka xirfad-nololeedka ee heerka dugsiyada sare.

Ka sokoow, kor u qaadidda xirfadda guud ama midda shaqsiyadeed ee ardayga iyada oo loo maryo waxbarasho xirfad-nololeed munaasab ahiyo xirfadaha bulshada heerkan oo loo marayo waxbarasho xirfad-nololeed munaasab ah.

Waxbarashad heerka dugsiyada sare ee Puntland waxay kaalin ama dowr wayn ka cayaarayaan ka hortagidda dhibta la xiriirta cudurada HIV/AIDS, maadaama da'da (14-19) ardayda dugsiyada sare dhigtaa ay yihiin kuwa ugu nugul aafada iyo khatarta cudurka HIV/AIDS. Iyadoo taas la eegayo, tixgelin gaar ah ayaa la siin doonaa sameynta wacyigelin heer sare ah ee ka hortaga HIV/ADISka iyo badelidda dabeecadaha bartayaasha heerkaas ah si ay ayaguna gacan uga gaystaan isbedelka ay wadaan waalidka iyo beelaha u dhow dugsi kasta.

Manhajka xirfad-nololeedka waxaa ka mid ah qaybo la xiriira isticmalka maandoori-yaha, xirfadaha, dabeecadaha, waxbarasha nolosha qoyska, hal adeeyg iyo mowduucyo kale oo muhiim ah.

Waxbarashada dhallaanka miyiga iyo kuwa kale ee danyarta ah (education for children of nomads and other disadvantages groups)

Dowladdu waxay ballaarin doontaa waxbarshada si loo gaarsiiyo dhallanka reer miyiga ah, beelaha tuulooyinka ku nool, iyo dhallaanka **dadka soo barakacay** (IDP) ee xeryaha ku jira taas oo loogu talagalay in lagu xaqiijiyo in u sinnaan iyo ka qayb gelin dhammaan fursadaha waxbarasho (helid waxbarasho).

Taas kadib Dowladdu waxay:

- Qaadaysaa/xoojinaysaa dareensiinta iyo baraarunjinta aqoonta bulshada (civic education) oo loogu talagaly walidiinta dhallanka reer miyiga ah kuwa dibadyaalka ah, hogaamiyayaasha maxaliga ah, macalimiinta dugsiyada iyo hogaanka gobolka si kor loogu qaado qiimaha waxbarashada beelaha reer miyiga ah.
- Soo bandhigid/xoojin barnaamij deeq waxbarasho oo jihaysan iyo kuwa kale oo soo jiidasho leh sida barnaamijyo cunta siin reer miyiga (DDX) (IDP) kuwa ugu baahida badan.
- Soo gudbinta barnaamij la xiriira soo jiidasho si loogu dhiirigeliyo macalimiinta in ay ka shaqeeyaan meelaha tuulooyinka ah.
- Xoojinta ka qaybgelinta waalidiinta reer miyiga ah gudiyada maamula waxbarashada heer kasta ee hanaanka waxbarashada iyo samaynta dugsiyada guurguura meelaha ay ka suurtowdo (esatalishment of "mobile" schools where facilitate)
- Waxay qadaysaa/xoojinaysaa farsamooyin aan caadi ahayn oo loogu gudbinayo waxbarashada beelaha reer miyiga ah/IDPS taa oo ay weheliso adeegsiga reediyowga iyo warbaahinta satellaydka iyo casharo horey loo **duubay/modules**.
- Taageeridda balaarinta soo gelitaanka waxbarashada dugsiyada sare beelaha tabarta yar (liita), iyo guryaha qaybaha dadweynaha soo barakacay, gabdhaha iyo curyaamiinta taa soo looga dan leeyahay kor u qaadista sinaan bulsho iyo siin dhalinyarada fursada nololeed badan.
- Samayn shuruuc (provision) loogu talagay baahida dhalaanka leh hibo waxbarasho oo khaas ah iyo in loo sahlo in dhalaankaasi gaaraan hibadooda waxbarasho meesha ugu saraysa oo buuxda.

Caruurta leh baahi waxbarashada oo gaar ah (children with special education needs)

Dowladu waxay samayndoontaa hab lagu taageerayo baahida waxbarashada gaarka ah oo ay la socoto shuruudo (provision) ku haboon qalab waxbaaris iyo bey'ad xor ka ah oodafayn dugsiga dhismihiisa ee

ay isticmaalayaan caruurta indhaha la', maskaxda curyaanka ah, si loogu helo waxyaabaha ay u bahaanyihiin dhalaanka kor ahaan u dhiman (physically challenged child.)

Dowladdu waxy fulin doontaa dejintooda harciyo munaasab ah oo lagu xaqiijinayo in naqshadaha dugsiyada cusub ku tala galaan (loogu talagalo) dhalaanka baahida khaaska ah leh iyo dhiiri galinta habka isku dhexdarka ee loogu talagalay in dhalaanka iinta fudud wax ku bartaan dugsiyada caadiga ah. Dowladu sidoo kale waxay samay doontaa macahad (institutions) loogu talagalay caruurta leh iimaha daran ee muuqda.
Shuruudo (provisions) ayaa la samyn doonaa lagu gaarayo baahida waxbarasho ee caruurta ubaahan xanaano (care) iyo ilaalin gaar ahaan caruurt soo barakacay (displaced) iyo kuwa dibada ka soo laabanaya; caruurta jid ku noolka ah (street child) caruurta shaqaysa; caruurta ciidanka ah; caruurta kaluumaysatada ah iyo caruurta ka timaada magaalooyinka iyo tuulooyinka beelo hoodu sabool yihiin (economically disadvantaged communities)

Taas oo keenaysa go'aan ujeedo badan ah oo lagu abuurayo taageero dhaqaale, la talin, hoy-siin, cunno, dhar, garoomo, caafimaad oo ay la socoto waxbarasho.

1.4. Qaabdhismeedka habka waxbarashada Puntland. (structrure of puntland education system)

Habka waxabarashada puntland waxay ka kooban tahay laba sano oo hormarinta dhalaanka da'da yar (HDhDY) (ECD) sideed sano oo waxbarashada aasaasiga ah iyo afar sano oo waxbarashada dugsiyada sare ah. Waxbarashada jaamacaddu celcelis ahaan waxay ka koobnaan doontaa afar sano (fiiri sawirka 1). Nurxurka (essense) habka waxbarashada Puntland wuxuu noqon karaa habaka 2-4-4-4. Siyaasaddu sidoo kale waxay aqoonsantahay waxbarashada aan tooska ahayn farsamada iyo farshaxanka gacanta in ay tahay qayb ka mid ah waxbarashada Puntland oo lagama maarmaan ah (as integral parts).
Dowladu waxay rumaysantahay jiritaanka dugsiyada quraanka (school quraan) kaas oo ku aadan baridda tababaridda, tarbiyadda islaamka iyo carabiga.

- Dowladu, waxay hubin doontaa (ensure) in si joogta ah loo kor meero loona taageero dugsiyada quraanka (schoolada quraanka).

HDhDY, barnaamijka waxabarashada dugsiyada hoose iyo waxbarashada aan tooska ahayn (Non – formal education) barnaamijka waxay ka mid noqonayaan qaybta (catogry) wxabarashada aas aasiga ah (basic education).
Waxbarashada aas aasiga ahi waxay u diyaarinayaan waxbartayaasha xirfadaha aasasiga ah ee akhris/qorista iyo tirsiimada iyo xirfadaha kale. waxbarashada quraanku waa qayb ka mid ah qaybaha HDhDY.
HDhDY waxaa la siinayaa (la gaynayaa) caruurta da'doodu u dhaxayso (shan) 0-5 sano jir.
Muhimadda HdhDY waa kicinta iyo horumarinta garaadka, wax qabadka iyo xirfadaha xaalad abuurka ee dhallanka yar.
HDhDY waxay caruurta u diyaarinaysaa iskuulka, una fududaynaysaa in ay guriga ka aadana iskuulada Waxbrashada aasaasiga ah.
Waxbarashada iskuulada aasasiga ah sida qaalibka ah(generally) waxaa dhiganaya ardeyda(la siinayo)da'doodu tahay(u dhexayso) 6-14 sano jir.
Waxbarashada aasaasiga ah qaybaheedu waxay ka kooban tahay, fasalka(grade) 1-4 wareega hoose iyo afar saano fasallada 5-8, wareega dhexe. Dhamaystirka qaybahaan waxaa lagu qiimaynayaa imtixaanka ka qalin-jabinta iskuulada waxbarashada aasaasiga ah ee Puntland isla markaasna goaaminaya gelitaanka dugsiyadda sare.
waxbarashada aan tooska ahayn ahayn(Non-formal education) (NFE) waxay tilmaamaysaa(refers) qayb balaaran oo fursada waxbarashada ah oo la siinayo dadka da'da yar(d'yarta) iyo dadka waaweyn waxbarashada dadban waxay ka kooban tahay tababarada farsamada gacanta, barida akhriska iyo qorida

dadka waaweyn(adult litrcay) ,waxbarashada caafimadka beesha, iyo howlqabadka dheeraadka ah ee beeraha.

Waxbarashada dugsiyada sare waxaa la siinayaa afar sano ardeyda da'doodu u dhexayso 15-18 waxay u gudbinaysaa imtixaanka shahaadada dugsiyada sare ee Puntland (Puntland Secondary School Certificate Examination) (PSCE).

U jeedada balaaran ee waxbarashada dugsiyada sare waa laba qaybood: **(a)** In ay siiso dadka ka faa'idaysanay aqoon ay ku doontaan waxbarasho dheeri ah iyo **(b)** In ay u suura geliso helitanka xirfadaha aasaasiga ah ee nolosha oo loo baahanyayay si loo helo shaqo lagu noo laado. (helida shaqo lagu noo laado).

Waxbarashada Jaamacadda (tertiary education) waxay tilmaamaysaa waxbarashada la helo marka la dhameeyo waxbarashada dugsiyada (dugsiyada sare). U jeedada waxbarshada jaamacaddu waa in ay Puntland ka caawiso helitaanka (gaaridda) heerka heer sarre (tiro sare) oo dad wax yaqaana (tababaran) (human resource) ku waas oo looga baahanyahay dhamaan qaybaha dhaqaalaha.

Waxbarashada macalimiinta waxaa munaasab ahaan (for convience) la raaciyey waxbarashada Jaamacadda. **Farsamada/ Tababarada Farsaada Gaanta (TVET)** waxaa loo qaabeeyey in ay keento (siiso) shaqo yaqaan taas oo lagu gaarayo ku celcelinta (inculcation) xirfado munaasab ah(ku haboon) iyo tababaro lagu abuurayo samaynta farsamo(technology) maxali ah(indigenous) technology).waxay sidoo kale waxa ka qabanaysaa baahida shaqo ee macaamiisheeda (it also respond to the basic accupational needs of its recipients).

1.5. Luuqadaha wax lagu baranaayo (Languages of instruction)

Somali,Arabi iyo English ayaa loo aqoonsaday luqoonyinka Dowladdu aqoonsantahay.

Waxbarashada aasaasiga ah luuqadda wax lagu baranayo (medium of instruction) laga bilaabo fasalada 1-8 waa soomali. English waxaa lagu bilaabayaa fasalada 2aad.

Waxaa wax lagu baranayaa marka laga reebo maadada Islaamiga, luuqadaha Somaliga iyo carabiga dugsiyada sare wuxuu noqon doonaa English.

Afka carabiga iyo waxbarashada Islaamka waxaa lagu baran doonaa luuqada carabiga fasalada oo dhan. Waxaa waxbarashada jaamacaddaha marka laga reebo carabiga iyo Kulliyadda Shareecadda, ay ku bixi doonaan English.

Iyadoo la siinayo kaalinta muhiimka ah ee luuqadu ka cayaarto hormarinta dadka iyo dhaqanka, dhiiri gelin firfircoon ayaa la siin doonaaa kor u qaadista luuqadaha Somaliga iyo dhaqanka waxbarshada heerarkeeda oo dhan.

Dowladu waxay sidoo kale aqoonsantahay baahida luuqadaha lagula xiriiro adduun waynaha kale.(dalka dibadihiisa).

Sidaa darted (Consequently), dowladu waxay si firfircoon u taageri doontaa barashada Carabiga iyo Englishka si luuqado caalami ahaan. Tixraac ahaan, taas oo la eegayo barashada luuqada Englishka waxaa loo dhiiri gelin doonaa in ay tahay mida lagu gaarayo technologiyada adyuunka, halka barashada Carabiga loo dhiiri gelin doono muhiimadiisa,dhaqan, ganacsi, iyo mida gobol isla markaasna ah midda wadda Diinta aasasiga ah ee gobolada Islaamka

Part II:

Siyaasadaha La soo Gudbiyey iyo Xeeladaha
(Proposal polices and statigies)

2. Ujeedada waxbarashada, manhajka iyo inta uu daboolo (coverage)
2.1 Horumarinta Dhalaanka Da'dayar (HDhDY) (early childhood development) (ECD)

Ujeedo (Objectives):

Ujeedooyinka Horumarinta Dhalaanka Da'da Yar
Kor u qaadida faham wanaagga, shacuurta, bulshonimada, koritaanka awooda wax sameynta iyo horumarinta dhalaanka yar.

HDhDY hadasfkeedu noqon doonaa in ay siiso dhallanka beyad ay si wanaagsan ugu koraan si ay u dareemaan nabad, firfircooni si ay u helaan fursad ay ku cayaaraan , wax ku baaraan waxna ku sameeyaan.

Manhajka horumarinta dhalaanka da'da yar (**HDHDY**) wuxuu siinaayaaa firfircooni aqooneed (aqoon firfircoon) iyo xifdin xirfadda wax samaynta (psychlogy-motor skills), iyo hal abuur. Waxay kale oo ay caawinaysaa goor hore xirfadaha wax ku oolka ah(wax taka ah)tiiyoo (ayaddoo) la isticmalayo hab waxbarasho oo dhaqanka waafaqsan(using culturaly oppropriate learing activities).

Tixgelin ayaa la siin doonaa nadaafada wanagsan (good hygine) iyo isticmaalka nadaafadda, quudin haboon, nafaqo munaasib ah (haboon), talaalid iyo koriimo losocod (grouth monitoring) iyadoo isla markaana kor loo qaadayo inta wanaagsan dhaqanka caruur korinta ee soo jireenka ah. Luuqada waxbaridu waxay noqon doontaa Af Somali.

Dowlad goboleeka Puntland waxay rabtaa (intends) in ay bilowdo oo ay xoojiso horumarinta waxbarida Dhalaanka da'da yar yar (HDhDY).

Sida loo hormariyo waxaa la yeeli doonaa:

- In la gaarsiiyo waalidka, howl-wadeenada guryaha, iyo goobaha xannanada dhallaanka 0-5 jir barnaamijka kor u qaadista horumarinta dhallaanka da'da yar.
- Taageerida dhallaanka iyo kuwa xanaaneeya gaar ahaan hooyooyinka si dhallaanku u noqdaan kuwo xannaanaysan oo caafimaad qaba (caafimad leh).
- Sii wanaajin isku dhaf ah (integarated car), taageero iyo xanaanayn taas oo laga helayo (that meet) dareenka dhaqanka bulshada (Psychlo-social), caafimaad, baahid waxbarashada caruurta taas oo dhiirigelinaysa cayaaraha, dabeecadaha waxbaaridda, garaad korid, (early conigtive grouth) iyo rogrogida isticmaalka qalabka.
- Dhiirigelinta beelaha in ay ka ciyaaraan kaalin firfircoon hormarinta (samaynta) qaab maxali ah oo loogu talagalay wanaajinta dhallaanka yar yar laguna darayo tababarida waalidiinta iyo

dadka kale ee ka howlgalo xanaanada siday u siin lahaayeen fursadaha xirfad nololeedka dhalaanka, sida wax cunidda, dhaqdhaqashada, dhargashiga iyo xal samaynta (xal gaarida).

- Dhiirigelinta in laga xurmo loo sameeyo horumarinta dhalaanka da'ada yar (HDhDY) (ECD) magaalooyinka gudahooda, tuulooyinka iyo dagaanada reer miyiga.
- Taageeridda samynta hab u jeedo badan ah kaas oo khuseeya shuruudaha horumarinta dhalaanka da'da yar yar oo howlgalinaya MOE, howlwadeenada caafimadka, dowlada maxaliga ah (local government) samaynta ka qayb galayaal (partiners) iyo qayb khaas (ku daridda manhajka barashada horumarinta dhallaanka da'da yar).
- Ku daridda manhajka qur'aanka (gelin) in badan oo Horumarinta dhalaanka da'da yar yar oo muhiim ah manhajka waxbarashada quraanka caruurta da'aas ah.
- Xaqiijin (ensure) samaynta xiriir haboon oo u dhexeeya Horumarinta dhalaanka da'da yar yar iyo waxbarashada schoolada aasaasiga ah.

Waxbarashada aas aasiga ah
Ujeedooyin:

Ujeedooyinka muhiimka ah **(main)** ee waxbarashada aasaasiga ah waa u bandhigid si kala hormarsan (kala horeyn leh)(si kala horeyn leh) dhalaanka Adduunka ku wareegsan Wiilka iyo Gabarba, iyo bud dhigid aasaas adag ee dhiiri gelin xarumo laga sameeyo magaalooyinkka, Tuulooyinka, iyo reer miyiga waxbarashadda mustaqbalka.

Waxbarashada aasaasiga ah waxay noqondoontaa:

- Kor u qaadidda dhaqan iyo caqliyad qiimo leh iyo helitaan ruuxi ah, taas oo sal u ah anshaxa iyo tiirarka Islaamka.
- Xifdisiin akhris aaasiga ah, tirinta (numbering) iyo xoojint xirfadaha isgaarsiinta iyo manipulative(hal abuur)
- Caawinta koritaanka tayada ijtimaaciga ah,ee dulqaadka,ixtiraamka dadka kale dhowrida nabada iyo wadaniyadda oo ah mida loo baahanyahay.
- Kicin rabitaanka ardeyda aqoonta iyo aasaas u dhigida barashada mustaqbalka.
- Korinta aqoon rabitaanka ardada

Jihada siyaasadda (policy direction)

Dowlada goboleedka waxaa go'aan ah (belan ah) (commited) siyaasadda leh ujeedoyinka soo socda;-

- Kor u qaadista ka qaybgalka waxbarashada aasaasiga ah dhalaanka da'doodu tahay 6-14 ugu yaraan 50% sanadka 2014.
- Sare u qaadida gabdhaha ka qayb galayaasha waxbarashada aas aasiga ah oo 36% ka qaybgalkoodu yahay in la gaarsiiyo 50% sanadka 2014.
- Kor u qaadista ka qaybgalka dhalaanka beelaha reer miyiga ah /tuulooyinka dugsiyada aasaasiga ah oo hadda 4% ka qaybgalkoodu lagu qiyaaso in la gaarsiiyo ka qaybgal ah 25% sanadka 2014.
- Kor u qaadid ka qeybgalka guud ee dhallaanka baahida gaarka ah ee ku jira waxbarashada assaasiga ah.
- Kor u qaadista ka qaybgalka guud waxbarashad aasaasiga ah dhalaanka kuwa bulsho/dhaqaale ahaan oo fursadahoodu yar tahay.
- Adkaynta kor u kac kasta oo ka qaybqaadashada waxbarashada ah oo yaraynta ka tegida waxbarashada, iyo dhicida gaar ahaan gabdhaha.

Siyaasada ujeedooyinka ugu badnaan waxaa lagu gaarayaa

- In lagu abuuro waalidiinta wacyigelin iyo hogaamiyayasha muxalliga ah si ay waxbarashada u siiyaan qiimo dheeraad ah.
- In la dhiso dugsiyada, dayactirkooda iyo balaarinta iyadoo loo eegayo dhanka khariirada ama meesha laga dhisayo.
- In la abuuro si haboon oo lagu soo jiidanayo iyo dhiirigelinta in badan oo bulshada ah ka qaybgal kooda, ururada, iyo kuwa kale ee aan dowliga ahayn oo waxbarashada u adeega.
- In la hormariyo wixii la xiriira manhajka waxbarashada aasaasiga ah.
- In la taageero soo saaridda tiro sax ah oo macalimiin tayo leh ee qaybta waxbarashada aasaasiga ah.
- In la siiyo heer sax ah (haboon) oo taageero dhaqaale iyo guno (incentive) habka waxbarashada aasaasiga ah.

Manhajka waxbarashad aasasiga ah waxa ay ahaan doonaan sagaal maado oo khasab ah ku waas oo kala ah: arabi, barashada Islamka, Somali, Xisaab (oo loogu daro barashada Busineska), saynis (caafimaadka, cilmiga bayada iyo beeraha) cilmiga ijtimaaciga ah (lagu daray taariikh, jugraafi, iyo dhaqanka civic), English, barashada cayaaraha sawirka iyo farshaxanka(craft).ardeda hoose iyo sare ee waxbarashada aasaasiga ah waxaa wax labaridoonaa 36 iyo 42 xiisadood oo casahar bixin ah oo midiiba tahay 35 iyo 40 minutes sida ay u kala horeeyaan isbuucii luqda waxbarashadu waa Somali marka laga reebo carbiga iyo barashada Islaamka; luqada Englishka waxaa loo baran maado ahaan laga bilaboo fasalka 2aad ilaa 8aad.

Dowladu waxay qaadi doon taa talaabooyin lagu balaarinayo soo galida dhamaan ardeyda gaadhay da'da iskuulka aasaasiga ah iyadoo kor loo qaadayo tayada iyo waxbarashada ardeyda. Habka waxbarist ee iskuulad aasassiga ah wuxuu noqon doonaa mid si casri ah u socda oo danaynaya(Focus) ka qabgalin, xalin dhibaato, firfircooni wax u doon, hal abuur iyo dad la socod(Bulshanimo).
Dowladu waxay dhiirigalinaysaa si firfircoon oo miro dhal ah barashada sawirada **diy** iyo farshaxanka fasalada hoose ee aasaasiga ah taas oo ah muftaaxa wax kicinaya dhaqanka maxaliga ah sidoo kale korista dhalaanka maskax ahaan iyo jir ahaan. Waxbarashada aasaasiga ah waxay dhiirigalindoontaa ciyaaraha iyo wixii kale oo dhaqana ahaan ku haboon hormarinta qaab dhismeedka dhalaanka.

2.3 Waxbarashada dugsiyada sare (secondary Education)

Marka lagu daro ujeedadii guud ee waxbarashada dugsiyada sare ee ku xusnaa qaybta 1.4,ujeedooyinka waxbarashada dugsiyada sare waa:

- Siin wax lagu hormarinkaro oo dhan ardeyga ruux ahaan, maskax ahaan , niyad ahaan, sida waafaqasan caqiidada(norms) iyo tiiraka Islamaka si ay u noqdaan kuwa waxbarashadooda u keeni kara hormarka loo baahanyahay.
- In bartayaasha lagu hubeeyo xirfad iyo dabecad haboon oo ka dhiogaysa in ay garaan faham adduunka ay ku nool yihiin.
- In ardeyda lagu qalabeeyo aqoon, xirfado, dabeeecado, iyo faham hoose oo haboon kaas oo muujinaya in ay gaaraan isticmaalka awoodooda oo dhan.
- Soo saarid ardey leh awood fiker xasaasi iyo xalin mashaakil

- Kor u qaadid (promote) dabeecadaha la xiriira wadaniyada, wax wada qabsiga iyo la qaybsiga.
- Samayn aasaas aqooneed ee ardeyda galaysa waxbarashada Jaamacaddaha Puntland iyo kuwa dibada.
- Ku diyaarin ardeydaas (equip),laga eryo waxbarashada dugsiyada sare, xirfado lagu shaqaysto oo suurta galinaya in ay la soo baxaan wax ay ku noolaadaan.

Si loo helo ujeedooyinka kor ku xusan, toban maato ayaa la barayaa dugsiyada Sare ah, magac ahaan:

1. Xisaab
2. Fisigis
3. Chemistray
4. Biology
5. Somali
6. Arbi
7. Cilimiga Islaamka
8. English
9. Ciyaaraha
10. (Physical education),

Oo khasab ah marka laga reebo Somaliga luqada Carabiga iyo Cilmiga Islaamka, luuqada wax lagu baranayo dugsiyada sare waa English. Dugsi kasta Todobaadkii waxaa uu ka koobmayaa 40 xiisadood oo 45 daqiiqo midiiba tahay.

Jihada siyasada (Policy direction)

Dowladu waxay si firfircooni ah uga shaqaynaysaa balaarinta iyo soo galitaanka iyo tayada waxbarashada dugsiyada sare taas oo ay la socoto siyaasada ujeedooyinka:

- Kor dhin ka qaybgalka dhalinta da'doodu tahay 15-18 waxbarashada Dugsiyada Sare ugu yaraan 20% isku darka da'daas sanadka 2014.
- Kordhinta ka qaybgalka gabdhaha soo galaya waxbarashada dugsiyada sare qiyaas ahaan 10% ilaa 30% tirade guud ee dugsiyada sare ee dowliga ah galitaan kooda sanadka 2014.
- Kor u qaadida ka qaybglka guud ee raga iyo dumarka dhalinta yar oo leh baahida waxbarashada khasabka ah, waxbarashada dugsiyada sare.
- Kor u qaadida ka qaybgalka guud ee beelaha reer miyiga ah, kuwa liit, iyo kuwa dhaqale ahaan aan fursad lahayn ee raga iyo dumar dhalin yaro ah, dugsiyada sare.

Dowladu waxay qaadi doontaa ollole lagu kordhinayo ka qaybgalka waxbarashada dugsiyada sare ku talagala siyaasadeed oo lagu dhisayo iskuulo iyo tababarid mucalin dugsiyada sare.

Dowladu sidoo kale waxay qaadi doontaa Ollole dhisid maktabado iyo xaqiijin in dugsi sare oo kasta uu yeesho maktabad shaqeyneysa..
Dowladdu waxay arki doontaa shuruudo munaasib ku ah(conductive) beyada waxbarashada/barista iskuulada taas oo lagu gaarayo dhisid in badan oo meelo waxbarista ku haboon ah iyo xeer munaaib ah iyo meelo wax akhrin oo u kala qaybsasn ardeyda gabdhaha iyo wiilasha.

S/ si loo hirgaliyo dhaqanka akhriska dawladdu waxa ay dugsiyada 6-aad ka samayndoontaa maktabado. Kuwaas si buucda loo qalabayey oo leh hawl wadeeno joogto ah.
Si loo xaqiijiyo buslsho-ku dhaqmidoodu (psycho-social) iyo koriimada buuxda ee dhalaanka dugsiyada sare,dowlada iyo bulshadu way ka wada shaqayn doonaan si wada jir ah si ay u helaan qalaba lagu cayaaro iyo agab dhamaan dugsiyada sare.

2.4 Waxbarashada Sare(Jaamacadda)
Teritaiary Education

Marka laga eego Puntland waxbarashada sare waxaa ku jir(ka mid ah) waxbarasho jaamacadeed, waxbarasho ay bixinayaan mu'asasooyin heer Diploma ah sida collegoyinka beelaha iyo macalimminta.waxbarashada sare waxaa loola jeedaa:

- Soo saarida aqoonyahan heer sare ah , oo looga baahanyahay dadejinta hormarinta bulshada-dhaqaalaha dalka (Socio-Economic)
- Siin aqooneed,xirfado iyo adeegyo kuwaas oo caawinaaya xalinta dhibaatada aqoon yahaynka(Human Resources) ee soo food saareysa bulshada.
- Ka faadiidaysiga aqoonta caalamiga ah, oo lagu daro hormarka tecnolojiyada muhimka ah,taas oo looga jeedo adkeynta hormarinta dalka.
- Samaynt,kor u qaadista,ilaalinta(dhowridda) iyo qaybint aqoonta iyo wixii kale oo qiimo leh oo loo baahanyahay.
- Samaynta iyo xanaaneynta ardeyda dhexdooda hal abuurka iyo xasaasiyada fakerka.
- Samaynt baaritaan wax ku soo kordhinaysa aqoonta ka jirta dunida oo xalinta mashaakilada markaas ka taagan bulshada dhexdeeda.

Siyasad udub dhexaadka ee ujeedooyinka waxbarashada sare waxay ku socon doontaa xaga kor u qaadista(Promoting) ka qayb galis loo siman yahay waxbarashada sare iyo kor u qaadida tayada iyo myhiimada barnaamijyada waxbarashada sare ee diyaarka ah.

Jahada Siyaasada:

Ujeedooyijka furaha siyaasada dowladu raacayso ee la xiriira kordhinta turada gabdhaha da'da yar ee ka qayb-galaya waxbarashada sare waa.

- Kor u qaadida boqolkiiba 10% dhalinyarada da'da 19-22 ee gelaysa macaahidda waxbarashada, Jaamacadda sanadka 2014.
- Kor u qaadida ardeyda dhediga ah ee macaahidda waxbarashad ugu yaraan boqolkiiba 40% tirade guud ee dadka waxbarashada sare sanadka 2014.
Aydoo macaahida siinaysa(u ogaolaanaysa) madaxbanaani ah(same level of authonomy). Qaybaha waxaa loo maarayn doonaa si maamul dhexaad ah taasina maaha in jaan goyn la aqbali karo laga helo ee sidoo kale in ay kor u qaado in ka mid ah heerka sinaanta shuruuda waxbarashada ku jira.(promote same level of equity in educational provision).

Ugu danbayn, dowlada goboleedku waxay masuul ka noqon doontaa xiriirint ololeynta hantida ee labadaba, maxaliga ah iyo heer gobolba.

*Gobolka/degmada/heerka dowladaha hoose.*Heerkani waxaa uu noqon doonaa mid taagera hirgalinta siyaasadaha uu sameyey wisiiraka waxbarashada heerka madaxtooyada.

Ugu horeyn gobol/degmo/dowladaha hoose(municipalities) ayaa ka masuul noqon doona kormeerka guud ee soo gudbinta waxbarashada meelaha ku haboon si loo xaqiiojiyo tayada adeega taagerada waxaa ku jiri doona (la socon doona) arrimaha lugta ku leh xulashada macalinka tababarida iyo lacgsiinta (remuneration). qaybin qalabka waxbarashada, kormeerka (monitoring) standarka ayadoo la adeegsnayo imtixaano iyo siyaabo farsamo iyo taageero aqoon leh. Tan labaad, heerkan waxaa ay taageeri doontaa heerka dhexe si ay u xoojiyaan EMIS oo ay u adeegsadaan isku xirka(wada xiriirinta) aruurinta macluumaadka iyo la socodka(fiirint) (monitoring) cilmi baarida maadooyinka xiriika la leh. Tan sedexaad, gobolada degmooyinka/dowladaha hoose ayaa horseedi doona habka (hab u socodka) manhajka maxliga ah horey u marintiisa(horey u marint manhajka maxaliga ah) oo laga eegayo kor u qaadista u dabacsanaantiisa baahida maxaliga ah. Tan shanaad heerkani waxay naqshadeyn doontaa barnaamijta kobcinta awoodda ee lugta ku leh tababarida (GQW)(ECS) iyo maareeyayasha dugsiyada iyo kooxaha bulshada ee xiriirka la leh.

Ugu danbeyn heerkan dhexe waxaa uu taageeri doonaa ololaha soo ururinta iyo maaraynta hantida ka soo baxda maxaliga ah iyo meelaha kale ee wax soo saarka.

Heerka maxaliga ah. Maareynta adeega heerka maxliga ah waxaa uu sida qaalibka ah ku jiri doonaa gacmaha (GWB) oo ay ku jiraan qof macalimiinta ka wakiil ah, waalidiinta iyo xubno ka mid ah beesha goobta iskuulku ku yaal GWB ugu horeyntii waxaa uu saamayn doonaa sharciyo ku hagi doonaa dhamaan arrimaha la xiriira maareynta iskuulka ee ururka timtablada iyo kalandarka ee debinta ardeyda iyo macalimiinta.
Tan labaad GWB waxa ay ku tiirsanaan doontaa abaabulka danta bulshada iyo taageerida waxbarashada ayadoo la adeegsanayo xullidda iyo ku celinta (retention) ardeyda oo loo adeegsanaayo abuurida ilo wax soo saar waxbarashada maxaliga ah.
Tan sadaxaad GWB waxaa uu wax ka qaban doonaa(involved) xullida iyo meelaynta macalimiinta, s(middeeda kale waxaa ay wax ka qaban doonaan go'aan qaadashadooda tabaraddooda iyo xulidda. Tan afraad, GWB waxaa uu kor meeri doonaa(monitor) inta ay iskuuladoodu siinayaan caruurtooda waxbarashada tayo leh waxaa ay aqoonsan doonaan (identify) shuruudo cilad bixin oo munaasib ah oo lagama maar maan ah.Ugu danbeyntii GWB, waxaa uu kor meeri doonaa(monitor) qalabka iskuulka si ay u sugaan(ensure) in bayada waxbarshadu tahay mid tayadeedu sareyso.

Hirgalint (implementing),maareynt iyo eegida barnaamijka waxbarashada.

Guulaysashada horgalinta(fulinta) WSWP waxaa ay u baahnaan doontaa: dhisidda heshiis guud (consensus- building) shuruudaha hagaya(guiding) habka waxbarashada puntland iyo maal galinta; suureyn (identification) strategiyada maal galinta ee ugu waxtarka badan; samaynt qaabka maareynta ugu munaasab san;iyo hirgalint habka kormeerka iyo hubinta oo ah mid naqshad badan(well designed).

Dhissidda heshiis guud ee mabaadiida WSWP, maalgaliteeda iyo hirgalinteeda (Consensus-building on the Principles of PEPP, its Financing and Implemantation)

Si loo dhiso heshiis guud (building of Conesus) WSWP waxaa la qaadi doonaa sedex heer:
Heerka madaxtooyada, oo ay raaci doonto tala bixin ku saabsan maswadda (draft) WSWP, kan ugu danbeeya ee la muraajiceeyey waxaa la hirgalin doonaa dowlda goboleedka si looga helo ogolaansho.
Gudiga goloha gobolka ee waxbarashada iyo laama golaha gobolka oo dhan ayaa ogolaanaya WSWP ka hor intaan loo soo gudbin parlamaanka, kaas oo siin doona taageero sharci ah(legal backing).
Sidoo kale heerka Madaxa sare, waxaa jiri doona baahi in la sameeyo gudi qaybta waxbarashada oo la shaqaynaya(isku xiraya) dolwda goboleedka puntland kaas oo loo baahanyahay in uu isu keeno dad wakiil ka ah waxbarasho kala duwan eek u howlan waxbarashada oo lagu daray kuwa masuulka ah barnaamijyada tabarada waxbarashada aan tooska ahayn, gudiga odoyaashaiyo kooxaha haweenka ee daneeya.(stakeholder group).tan sedexaad ee heerka tala bixinta muhiimka ah ee heerka Madaxa sare(head quarter) (xataa gobolada puntland) waxaa ay u baahantahay abaabul hal abuur deeq bixiyaha ah si loo yareeyo isku dhaca suurtoobi kara iyo mar labaad samayta(duplication) kheyraadka (hantida) ka kooban ee waxbarashada, tani waxaa ay u yeeraysaa abuurida deeq bixiyayaasha dowlad goboleed/gudiga isku xirka.teeda kale(among other things) gudigaan waxaa uu diyaarin doonaa si ama hab heer dhaqameed(same from code of conduct) si ay u hagaan howlgalka ka qaybgalayaash WSWP. Waxaa ay muujin doonaan(spell out) howsha iyo waajibaadka koox kasta.

Ee la xiriira habka qaybint guud, ee ay ka mid tahay diyaarinta iibinta alaabta (procurement) iyo muraajico sanadeedka WSWP si wada jir ah(joint, qiimayn iyo habka warbixinta. Agaasimaha guud ee waxbarashada iyo wakiilka hayada deeq bixiyayaasha muhiimka ah ayaa hogaamin doona hindisaha (hal abuurkan)(initiative) loo dhan yahay (joint).

Ugu danbeyn, dowladu waxaa ay noqon doontaa in ay taageero ka helaan bulshada ay khuseyso (relevant constancies) ee gobolada/ degmooyinka/heer degaan (heer gobol/degmo/degaan. Ayadoo la ogyahay kaalintooda, waxaa laga filayaa beelaha iyo kuwa ay khuseyso in ay ka shaqeeyaan sidii loo maareyn lahaa loona maal galin lahaa habka waxbarashada, una heli lahaayeen taageero siyaasadeed oo ah mid muhiim ah.

Tani waxaa ay u baahantahay in laga warhayo dhaqan galinta(hirgalinta)WSWP iyo samaynta fursado kale oo wada tashi iyo dood ku saabsan ku guuleysiga siyasada iyo istaraatiijiyada WSWP.

Hadaba, AG waxaa uu horsed u noqon doonaa qaybinta qoraalada koobana ee la xiriira WSWP, waxaa uu qaadi doonaa bandhigyo idaacadda waxaa uu qaadi doonaa kulamo waawyn iyo kuwa yar yarba.

Marka rayiga kooxaha danaynaya ay(khuseyso) la helo, waxaa lagama maarmaan noqon doona in lagu daro WSWP waxaa ay u baahantahay in loo arko in ay tahay mid firfircoon ee aan ahayn waraaqo meel iska yaala(dynamic not static).

Dhaqan galinta barnaamijyada WSWP.

In laga shaqeeyo rayiga guud la isku raaco (consensus-building), ayaa ah talaabooyinka ugu horeeya ee hirgalinta WSWP.

Hirgalinta hore iyo maraaxisha maareynta waxaa ay noqon doonaan:
Samaynta xoghayn ee WSWP; naqshada iyo samaynta tababaro munaasib ah; iyo hormarin qorshayaasha waxbarasho ee Puntland, gobolada, degmooyinka, iyo dowladaha hoose.

Aasaasidda (establishment) xoghaye hoos yimaada wasiirka waxbarashada (MOE). Secretariat WSWP (PEPP) oo hoos yimaada AG ayaa masuulka noqon doona dhamaan arrimaha la xiriira fulinta (hirgalinta), maareynta, kormeerka iyo hubinta (evaluation) barnaamijyada WSWP.
Halbowlaha xoghayaha waxaa uu noqon doonaa xooga howlgalka WSWP oo hoos imaanaya hogaanka AG.(howlwadeenka) (xooga howlgalka) (the task force) howlwadeenadu waxaa ay ku xirmi doonaan deeq bixiyayaasha si ay ula dejiyaan(u dejiyaan)stratijiyada lagu hubinayo in xoghayuhu leeyahay awooda loo baahanyahay in ay hagto fulinta WSWP. Waxaa kale oo jira, xoojinta awooda (capacity strengthening) waa in lagu daraa hormarinta awood xirfadeedka xoghayaha kor u qaadidda barnaamijyada tababarka, balaarinta ka mid noqoshada kooxda tala bixinta xoghayaha kooxda daneeyayaasha (stakeholder) iyo samaynta qaab dhismeed munaasib ah.
Xoghayaha WSWP waa in uu diyaar yahay (set up) saddexda bilood ee ugu horeeya ee sanadka 2004.

Ficilka samaynta maabka (khariirada) howlgalka iskuulka. Hadii midka si fiican loo fuliyey,howlgalka khariirada iskuulka ee caadiga ah waxaa ay keenaysaa hab go`aan qaadasho aqoon ku dhisan ee ku saabsan meesha laga dhisayo iskuulada cusub iyo macaahida kale ee waxbarashada sida collegka tababarka mucalimiinta. Xaqiiqo ahaan, hadii baahida beelahu yartahay fursadoodda waxbarashada la siiyo tixgelin deg deg ah ee habaysan(urgent and systemic), xoghayaha WSWP iyo ururada howlwadaaga(partiner) ah waxaa laga sugayaa in ay dejiyaan khariiradda iskuulka ee shaqaynaysa bilowga sanadka 2004.

Diyaarinta Buugga Tixraaca (manual).

Buuga tixraaca hirgalinta WSWP.guusha hirgalinta WSWP waxaa ay u baahantahay in heyada dowliga ah ee fulineysa leedahay faham cadd ee waxa lag rabo ah.(laga filayo).
Buuga tixraaca fulinta WSWP waa in uu sharxaa sida caadiga ee aaasiga ah, waxaa la iska rabo criteria iyo iyo habka la raaciyo mid kastoo u jeedo Ujeedo iyo istraatiijiyadda siyaasadda WSWP.
Tani waa in ay fududeysaa howlgalka WSWP ee lagu gaarayo joogtanyta xiliga dhaqan galinta waxaa ay kor u qaadi doontaa waafaqidda cabirka lagama maar maanka ah (essential parameters) ee loo baahanyahay in barnaamijyada WSWP noqdaan kuwa sii jira (sustain).

Buugga tixraacu waxaa kale oo laga helayaa howlgal faahfaahsan ee kaalinta iyo waajibaadka hawlwadeenada/xafiisyada waaxyaha (departments) fulinaya kor meerka(monitoring) iyo habka loo warinayo(reporting),qiyaasida maal galinta ee soo iibinta(procurement) badeecada iyo adeega,habka(mechanism) deeqda, xisaabaatanka iyo faaqidaada(auditing) u socota.
Waxaa intaa ugu muhiimsan fulinta buuga tixraaca waa in ay calaamadiisa(demarcate) meesha xasaasiga ah ee ku taxaluqa siyaasada go'aan qaadashada.

Laleh xiriirka tooska ah heerka (field- level) fulinta (implementation)
Samaynta tababar laxiriira. Dhaqangalinta WSWP waxa ay fardi yeeli doontaa (impose) masuuliyado ku cusub oo adag (challenging) madaxda WW dhamaan heerarka hanaanka wax barashada gaar ahaan si ay unoqoto mid hir gashay una yaraysa habka baahsan ee awooda maamul oo wax ku ool ah tani waxay keenaysaa in sicusub wax loo sameeyo heerka madaxtooyada maamulayaashu waa in ay aqbalaan in awooda iyo kharajku (hantida) (resources) inteeda badan aysan xukumin ee maareeyayaasha iskuulada iyo dagmooyinka ay doorka ugu badan ee miisaaniyada waxbarashada lahaandoono iyo waliba lasocodka horumarka ku aadan yoolka WSWP udagsan ee dagaankooda sidoo kale madaxda iskuulka waxaa laga filayaa inay qabtaan shaqooyin adag sida horumarinta manhajka lasocodka (kawarhaynta) mashaariicda iskuulka dayactirida dhismayaasha iskuulka iyo kawada shaqayn gudiga waxbashada bulshada (GWB) maaraynta maaliyada, hadaba waa laga mamaarmaan wacyigalinta rajada WSWP.

Anagoo taas madaxa kuhayna waxaajiri doona tababaro isdabayaal waxaa loo baahanyahay in la diyaariyo koox tababarayaala oo socod siiya casharo wacyi galinaya madaxda sare ee WW gobolka dagmooyinka iyo shaqaalaha dagaanka shaqaalaha jaamacadaha madaxda dugsiyada sare iyo gudiyada maareeya waxbarashada asaasiga ah tababarkaasi waa in uu qabsoomaa nuska labaad ee 2004 ka.

Horumarinta qorshayaasha waxbarashada taabo galinta. WSWP waxa aysalka kuhaysaa (entails) u hawlgalinta ujeedooyinka siyaasadeed iyo jaangaynta (strategy) ku qeexan (spelt) qaybta labaad (part 2) waraaqaha (document) WSWP

barnaamijyo iyo mashaariic lagaari karo (muuqda) tan waa in lagafuliyo heerka madaxtooyada waana in ay kulmisaa qorshaha horumarinta waxbarashada puntland ee ah mid dhexe iyo mid fog iyo heer qorshayaal waxbarasho ee gobol/ dagmo/ dagaan barnaamijyada iyo mashaariicda loosoo gudbiyay xafiiska dhexe (central) iyo heerarka kale inta suurto galka ah ee miisaaniyada maxalliga ah ee diyaarka ah waxayna qeexi doontaa wax qabad gaar ah wax soosaar hadaf tilmaamayaal iyo miisaaniyadan loo baahanyahay si loo xaqiijiyo in ay si guul ah ku fusho sida ka muuqata xaqiiqada miisaaniyada lahayo ayaa mar walba noqondoonta in ay inbadan kayaraato baaxada dhibaatooyinka wax barasho ee haysta puntland qorshaha horumarinta ee gobolka iyo dagmada waa inuu kusalaysnaadaa hab la aqbali karo oo kala hormarinaya sida loogukala baahi badanyahay ugu dambayntii helitaan kale horumarinta baahida waxa ay kusalaysnaan doontaa ogaanta miisaaniyada waxbarasho ee diyaarka ah waa lagama maarmaan in dhamaan kaqayb qaatayaasha waxbarashadu gaar ahaan deeq bixiyayaalka qaybta ugubadan miisaaniyada waxbarashada puntland si ay usheegaan inta

aynoqondoonto balanqaadkooda dhaqaale rayi ahaan dhamaan taagerayaasha Waxbarashada Puntland waa in ay isku raacaan sanduuqul maal oo lagu maal galiyo oo kakaliya barnaamijyada iyo mashaariicda u garto maamulku in ay yihiin kan la horumarinayo.

Maal galinta barnaamijyada WSWP in lagu guulaysto fulinta barnaamijyad WSWP waxa ay u baahantahay wada shaqayn dheeraad ah ee ka dhaxaysa maamul goboleedka ururada ijtimaaciga ah iyo ka qayb galayaasha dibada waxaa la filayaa in maaliyada loo baahanyahay in lagu taageero waxbarashada ay ka iman doonto shan meelood oo ah dawlad goboleedka faa iidaysta yaasha waxbarashada bulshada maxaliga ah iyo reer puntland ka dibadaha jira enyrepreneurs ka gaarka ah iyo miisaaniyada dibada oo ay lasocoto deeq bixiyayaalka ururada aan dawliga ahayn iyo ururada diinta khayraadka dawlad goboleedka .

Hantida Dowlad Goboleedka(Regional government Resources.)

Dawlad goboleedku waa inay kor uqaadaa daneenteeda ku taxalluqda (lugta ku leh) maal galinta waxbarashada si ay u hesho ogolaanshaha ah inay tahay hogaamiyaha iyo maamulaha (overseer) hanaanka (standar ka) waxbarashada puntland waxaan hadal kajirin in awooda maalgalinta waxbarashada ee dawlad goboleedka ku xirantahay korridda dhaqaalaha ee Puntland iyo inta uu la egyahay dakhliga dalku kasoo uruurinkaro muwaadiniinta iyo qaybta dhaqaalaha madaxa banana dhamaan baaqyada lagamamaarmaan ka ah waa wanaajinta dawlad (dawlad wanaaga) iyo muhiim ahaan, fulilnta siyaasada macro-economic ee munaasab ka ah horumarka dawladgoboleedku waxa uu ku xiranyahay aruurinta dakhliga jiritaanka horumar la aanta qaybta waxbarashada ugu yaraan 25% miisaaniydapuntland waa in lagaliyaa waxbarashada 10 sano ee soo socda taageerada waxaa dheer in la abuuro (lasameeyo) institutions oo wax barashada khayraadka dawladgoboleedka ee diyaar ka ah waa in lagaarsiiyaa in labixiyo mushaharka macalimiinta iyo shaqaalaha haw wadeenada waxbarashada adeegyada baarida iyo qiimaynta horumarinta manhajka iyo taaba galintiisa iyo barnaamijyada guud ee waxbarashada .

Kharash wadaaga. Garawsiga xaqiiqada inaysan dawladgoboleedka iyo deeqbixiyayaasha ka suurtoobayn inay dhabarka uritaan dhamaan kharajka la xiriira maalgalinta waxbarashada kuwa faaiidada kuqaba waxbarashada in badan waxaa loogu baaqidoonaa inay **wax ka bixiyaa hantidooda**. Hadaba kuwa ka faa iidda (faaiidada ku qaba) waxbrashada iyo waalidiintooda waxa loo baahanyahay inay qiimayaan waxbarashada markay ogaadaan in faaiido laga helayo Markaas dawladgoboleedka ayaa laga doonayaa inay samayso dadaal kasta oo lagu xaqiijinayo (prove) qofka waxbarashada dalbaya inay jirto qiima kurdhin shaqada waxbarashadu wadato taas iyo **strategiyooyin kale** ayaa laga duuli doonaa.

WSWP siyaasadeheeda waxbarashada iyo **strategies** waa inay intay gaari karto suurto galka ah ee lagu jaan gooyey dhaqanka, luqdda iyo qaabka diinta bulshada Puntland in laga doono ka faaiidaystayaasha waxbarashada bixin qayb kharash ka ah maaha waxa gabi ahaanba aan lafilayn waxa xaqiiqo in reer puntland celcelis ahaan aysan ka liidan dhaqaale ahaan (dawlada dariska la ah) inta badan wadamada dariska la ah Kenya Ethopia and Eritria oo ay ka hirgashay dhaqanka kharaj wadaaga taas waxaa ka markhaati ah dhaqashada xoolaha iyo dhaqdhaqaqa ganacsiga balaaran ee keenay in bulshada inay in badan oo ka mid ah dakhligoodu kor ukoco (uu noqdo mid sareeya) .

Sidoo kale ma aha mad si fudud looga boodi karo taageerayaasha kharash wadaagga taas oo laeegayo heerka muuqda ee isticmaalka kharajka qaybo kamida ah bulshada, iyo inbadan oo dakhliga ah eelagu bixinayo qadka.

Intaa waxa dheer, maqnaanshaha samaynta iyo socod siinta dugsi dawladdu maamusho oo si fiican u shaqaynaya, Soomaali badan waxay lacag ku bixiyaan wax barashada khaas ka ah ee caruurtooda heerarka dugsiyada asaasiga iyo kuwa sareba, Soomaali badan oo gaartay da'da waxbarashada jaamacaddaha, ayaa sidoo kale dhigta Institutions ka waxbarashada sare ee dalka iyo dibadda. Waxaa

suurto gal in in badan oo waalidiinta Soomaalidu iska bixiyaan **fiiga** dhallaankooda kujirta Dugsiyada Dowladdu maamusho. kuwa aan bixin karin dhamaan inta lagu leeyahay ayaa ka faa iidaysan kara hab lacag bixin (**bursary schemes**). Kuwa aan iska bixin karin fiiga waxbarashada ayaa ka faa'iidaysan kara habka deeqaha waxbarashada.

Sidoo kale waalidiinta waxaa la waydiin karaa inay waxbarashada ugu deeqaan waxbarashada xoolahooda , qalabkooda ama xoogooda.

Reer Putlandka dibad jooga ah. Bulshada maxalliga ah iyo shakhsiyaadkuba sidoo kale ayaa samayn kara in badan oo kor loogu qaadayo horumarinta waxbarashada Puntland. Mar labaad, ka qaybgalka kooxahaas hab u socodka waxbarashada waxay kuxirantahay inta ay qiimaynayaan waxbarashada iyo inta dowlad goboleedka loo arko inay si wax ku ool ah u cayaarayso kaalinteeda wax barashada ee isku xirka iyo korjooge nimada. Sidoo kale waxaa loo baahanyahay in beelaha laga qanciyo niyada wanaagsan ee deeq bixiyayaasha iyo kaqaybgalayaasha kale ee waxbarashada oodibada kayimaada marka lahelo niyad wanaagga beeluhu waxay siyaaba kala duwan utaageeri doonaan horumarinrta waxbarashada. Ugu horayntii, waxa ay qaban qaabin karaan olole lagu uruurinayo hanti loogu tala galay machad gaar ah ama barnaamijyo u faaiidaynaya dagaanadooda , dagmooyinkooda ama goboladooda . Tan labaad, beeluhu waxay taageeri karaan mashaariicda loogu tala galay in dakhli ay u abuuraan, sida ay u kala leeyihiin macaahida waxbarashada loona isticmaalayo adeegyada ay bixiyeen Institutionadaas oo ku salaysan hab ganacsi. Adeegyadaas waxaa kamidnoqonkara soosaarida dalg beereed laga soosaaro beerta dugsiga iyo soosaarid qalabka xafiisyda ama barnaamijyo tababaro ah oo loogu talo galay dhalaanka dugsiga kujirin iyo dadka waawayn iyo hal abuur kale oo ganacsi ku jiro (among other commercial initiative). Beelaha maxalliga ah sidoo kale ayaa abaabuli kara olole dhaqaale (hanti) aruurin ugaar ah oo ufaa'iidaynaya iskuulada oolalayntaas hanti aruurinta waxaa lagu dari karaa ka qayb galin **in walks** iyo hal abuur laxiriira ee loogu talagalay barnaamijyo dugsiyo gaar ah ama kharash loola jeedo ardayda masaakiinta ah (saboolka ah) xubin ka mid ah bulshada ayaa ku taageeri karta waxbarashada u baahan wax qalab ama lacag iskuulka loogu deeqo ama ardayda u baahan. Soomaalida ku nool meel ka baxsan Puntland (out side) waxa ay siin karaan taageero dheeraad ah sida tala bixin, lacag, iyo adeeg wax barid oo ku xiran heerkooda khibradeed.

Waxaa kaloo ay ku deeqi karaan qalab waxbarasho sida buugaag iyo computerada. Waxaase ahmiyad intaas **ka badan** leh sidii ay surta gali lahayd in ay u isticmaalaan xiriirkooda caalamiga ah, hanti uruurin loogu talagalay mu'asasaadka waxbarasho, ay si gaar ah uga faa'iidaysan karaan ardada saboolka. Iyo abaabulka isku xiridda barnaamijyo ka dhaxeeya machadyada waxbarashada Puntland iyo kuwa ku yaalada dalalka ay ku nool yihiin ama ka howlgalaan.

Ganacsatada gaarka ah. kaalinta taageerada horumarinta waxbarashada Puntland ee qeybaha gaarka ah weli lagama faa'iideysan. Ugu horreyntii, ganacsi assaasayaasha gaarka ah waxaa loo baahan yahay in la dhiiri galiyo, in ay sameeyaan iskuulo loogu tala galay reer Puntland awooda waxbarashada gaarka ah, si loo soo jiito bartayaasha imaan kara. Waxbarashada lagu bixinayo iskuulada gaarka ah waa in ay noqotaa mid tayo sare leh. Intaas waxaa dheer milkiilayaasha iskuuladaas iyo dalabka ka faa'iideeystayaasha iskuulada waxbarashada khaaska ah, dowlad goboleedka waxa uu yeelan doonaa kaalin weyn oo lagu xaqiijinaayo in daneystayaasha aan xishooneyn aysan dhiig-miiran ama u dulmiyin macaamishooda.

Dowlad goboleedka wa kale oo ay u baahan tahay soo gudbin, soo jiidasho hantiilayaasha iskuulada khaaska ah siin dhul ay ka dhisaan **iskuulo**, canshuur dhaaf alaabta iskuulka iyo siinta deeq aan la soo celineyn iyo ansixida sharci dhowraya (ilaalinaya) xaquuqda ganacsi bilaabayaasha waxbarashada, in ay furan oo socodsiiyaan iskuulo oo faragelin aan loo baahneyn uga imaan dowlad goboleedka, xukuumada maxalliga ah, siyaasiyiinta, iyo bulshada maxalliga ah.

Tan labaad, qeybaha waxbarasho ee gaarka ah waxay ardayda aqoontoodu sareeyo iyo kuwa liitaba ugu deeqi karaan deeq waxbarasho iyo abaal-marino-kale. Deeqahaaas waxaa laga bixin karaa mu'asasadaha waddanka gudihiisa ama dibadiisa.
Tan sadaxaad, qeyybta khaaska ah waxa ay siin kartaa institutionska (macadyada) waxbarashada qalab waxbarasho ama waxay siin kartaa adeeg laxiriira meelaha takhasuskooda yahay saami kadib saami aan faa'iido doon ahayn.

Shirkadaha computerka waxay ku taba ruci karaan computers , computer software iyo bixin adeeg internet (ISPs) oo lacag la'aan ah. waxay kaloo ku taba ruci kartaa adeega internetka oo qiimo jaban. Shirkada buugaagta daabacda waxay ku tabaruci kartaa buugag iyo qalab la xiriira.

Afraad, mu'asasaadada maaliyadda waxa ay siin kartaa mu'asasaadka waxbarashada deeq iyo deyn lagu horumarinta qaab dhismeedka (infrastructure) waxbarashada ama u faa'iideyn karta ardeyda maskaxdoodu ama wax barashadoodu sareyso (talented) iyadoo lagu xiriirin karo mu'asasaadka waxbarashada maalgaliya. Ganacsata gaarka ah (entrepreneurs) waxa ay taageeri karaan barnaamijyada isdhex-galka ardeyda iyo howlwadeenada waxbarashada (teaching staff) gaar ahaan kuwa heerka dhexe iyo mu'asaasasadaha herka waxbarashada sare iyo waliba ku sii xirka mu'asasadaha wada barnaamijyada cilmi baarista.

KA-QAYB-GALAYAASHA DIBADDA: (EXTERNAL PARTNERS)

Ka qayb-qaatayaasha ka baxsan wasaaradda waxa ay isugu jiraan ururada lammaanka ah iyo kuwa kooxkooxda u shaqeeya. Waxaa ayaan darro ah in wadaagayaasha dibaddu ahaan doonaan hogaamiye la xiriira taageeridda waxbarashada Puntland, gaar ahaan waxbarashada assaasiga ah, waxbarashada aan tooska ahayn, waxbarashada dugsiga sare, waxbarashada macalimiinta iyo waxbarashada jaamacada. Maxaa yeelay, dowlada Puntland heerarka assaasiga ayaa ah kuwo aan wax loo heyn.

Ha ahaatee, taageeradu waa in ay si badan ku aadan tahay kor u qaadida tayada la xiriirka (relevance), maareynta, qorsheynta iyo wada shaqeynta adeega waxbarashada iyo inyar xagga dhismaha iyo dayactirka qaab dhismeedka. Si kastaba ha ahaatee, jaalayaasha deeq bixinta waxaa muhiim ah inay taageeraan barnaamijyada horumarinta qaab dhismeedka (infrastructure) gobolada fog fog oo dhaqaala ahaan fursan u laheyn iyo barnaamijka kooxaha tirade yar sida haweenka iyo ardayda leh baahida gaarka ah.

Jaalayaasha deeqda bixiya (partners) ayaa sidoo kale loogu yeeri karaa in ay maal gashtaan horumarinta mu'asasaadka **dhanka** horumarinta macalimiinta iyo tacliinta sare oo ah mid ka jirta heer billowga ah mashaariicdaas ayaa dibada ka ah awooda inta badan beelaha maxalliga ah.

Kor uqaadida tayada iyo haboonaanta Jaalayaasha dibada waxaa loogu yeeri doonaa: In ay sii wadaan taageeridda barnaamijyada tababarka ee macalimiinta iyo howlwadeenada kale waxbarashada; waxbarashada khaaska ah / qalabka barridda oo ay ku jiraan Buugta ardeyda iyo qalabka kale oo ay ku jiraan computers, meesha looga baahan yahay, meeshay ka suurowdo; muraajeceynta iyo hirgelinta manhayka. Taageerada kale oo ay ku jirto kuwa la xiriira taageerada syniska iyo dhisida libariyo iyo qalabka la xiriira mareynta iyo qorsheynta, taageero dibada ah waxaa ay hadaf ka dhigan doontaa tababarida howlwadeenada maareynta waxabarashada- laga bilaabo Madaxa macalimiiinta ilaal maamulayaasha sare; iyo kor u qaadida baaxada habka-waxbarashada ee aruurinta- faaqidaada, **baaritaaka** (anlysis), maareynta iyo isticmaalka macluumaadka.

Jaalayaasha dibada ayaa yeelan kara kaalin taageereysa ururada u dhexeeya (dhex jooga ah) Dowlad goboleedka iyo mu'asasaadka waxbarashada iyo kuwa ku howlan (focused) joogteynta adeegyada waxbarashada. Maqnaanta Dowlad goboleed xooga leh, ururada deeq bixinta waxay wadi doonaan in ay buuxiyaan kaalinta isku xirrada taas oo ay ka ciyaarayeen gudi qaybeedka waxbarashada (GQW) ee

Golaha Xiriirinta Deeqaha Somalia (GXDS) (SACB). *GQW* wuxuu diyaariyaa kulan macluumeedka isweydariyo niqaasha arrimaha la xiriira siyaasadda iyo xiriirinta arrimaha gudaha.si looga hadlo si buuxda baahida waxbarashada Somalia guud ahaan iyo Puntaland gaar ahaan, kulankan waa in uu noqdaa mid aruurinaya codka somalida si ka badalan sida uu hada yahay. Xarunta **kulanka** ee xafiiska qaramada madowbey ee Nairobi ma ah mid ujeedooyin ka turjumaya sidaa darted mustaqbalka dheer waa in lagu tala gala wareejintiisa Somalia gudaheeda.

Intaas waxaa dheer suurta galka in dib u furidda xafiiska Somalia, waxaa loo baahanyahay in howlwadeenada muhiimka ah ee gudigan ay noqdaan aqoonyahano Somalieed oo xirfad leh ama waa in ugu yaraan la helaa si lagu xaqiijinayo in Somaliya wakiilo ku filan loo helo.

Naaqsinimada labaad ee GQW waxa ay tahay guul dareysiga tirtirida ama baabinta in deeq bixiyayaashu isku wax sameeyaan, ha noqoto barnaamijyada ay taageeraan ama meesha ay ka howlgalaan deeq bixiyayaasha ururinta iyo adeegsiga dhaqaalaha si wada jir ah, waxaa lagu xoojin doonaa: dhisidda heshiis guud DGP/Deeq bixiyayaasha ka wada shaqeynta tusayaasha; xaqiijinta in barnaamijyada iyo mashaariicda ay wadaan deeq bixiyayashu muhiimadoodu ku xusantahay WSWP ama (xaqiijinta barnaamijyada iyo mashaariicda heysta taageerada deeqbixiyayaasha muhimaddooda WSWP); isla wadaaga macluumaad kasta oo loo baahanyahay; muwaafaqada wax kastoo xiriir ku leh doorashada mashaariicda u baahan taageero isla markaasna u qalma in laga caawino xagga farsamada; deeq bixiyayaasha howlaha ku jira waa in ay firfricoon u dhiirigaliyaan dhisida figaradd guud taageeridda mashruuca, iyo ka qaybgalinta wakiiladda maxaliga ah dhamaan hab u socodka howlaha.

XUKUUMADDA MAXALLIGA AH/DOWLADA HOOSE WIXII KA BAXSAN.

Dowlad goboleedka, xukuumadda maxalliga ah iyo dowladaha hoose ayaa taageero weyn u samayn kara waxbarashada goboladooda iyo magaalooyinkaba. Ugu yaraan waxay siin karaan dhul lagu dhiso dugsiyo iyo macaahidda kale ee waxbarashada,tan sedexaad xukuumada maxaliga ah ayaa qaadi karta barnaamijyo wakiil nimo ee ardeyda talentiga leh ayadoo deeqdu(endowments) ka imaanayso ganacsiga iyo ururada aw qaafta.
Tan Afraad, waxaa ay kaalmooyin ka raadin karaan qalabka dhismaha, tababarada/barida xataa iskaa wax u qabso (labour input) ee bulshada muxalliga ah.

KORMEER IYO QIIMAYN BARNAAMIJYADDA WSWP.

Magacaabidda umug kormeer iyo qiimayn. Ku guuleysashada hirgalinta WSWP waxaa ay ku xirantahay dejinta istraatiijiyad kormeer iyo qiimayn. Tani waxa ay caawinaysaa eegidda illaa iyo inta laga gaaray ujeedadii laga lahaa iyo suuradinta dhibta hortaagan hadafka la rabay in la gaaro, si loogu toosiyo abbaarta qorshaha iyada oo aan wakhtigu lumin. Si tan loo sameeyo, waxaa lagama maar maan ah in lala yeesho wada tashi joogto ah bulshada rayidka ah iyo kuwa kale ee danaynaya oo lagu muraajicaynayo horumarka barnaamijka ayadoo loo marayo xoghaynta WSWP iyo dowlada gobolka iyo maxliga, iyo kulan mar mar ah eel ala yeelanayo deeq bixiyayasha muhiimka ah WW. Sidaa darteed waxaa jira baahi in la dhiso qayb (unit) kormeer iyo qiimeyn WSWP oo hoos yimaada waaxda qorsheynta.

Masuuliyadda kaloo oo u dheer qaybtani waa in ay dejisaa ama soo bandhigtaa jadwalka iyo qodobada muhiimka ah ee muraajicaynt muhiimka ah ee WSWP, **heliyo** kormeeka iyo qiimeyn. Waaxdan (unit) sidoo kale ayaa dejinaysa siiqada caqliyada muraajicada khaaska ah ee qaybo ka mid ah ururada deeq bixiyayasha ee ku dhexjira **micnaha** guud ee muraajica sanadeedka WSWP la socodkaas oo ay raaceyso heshiis hormarin ah ee ka dhexeeya kooxaha dantoodu ku jirto aragtida muraajicadaan.
Intaas waxaa dheer, waaxdani waa in ay ka tala bixisaa waqtiga lagu shaqaynayo (time frame)

Iyo cabirka looga faa'iideysanayo (utilizing) isticmaalka natiijooyinka habka kormeerka (monitoring) jadwalka howl socodka balaaran ee WSWP mashaariicda madaxa banaan ee laxiriira WW. AG ayaa jiheynaya howlgalkan. Waaxdan waa in la dhisaa marka WSWP fulinteedu bilaabato, rajo ahaan 2004.

Awooda xog-ururinta iyo falanqaynta ee WW. Howsha ugu horreysa ee WSWP waaxd kormeerka iyo qiimeynta waxa ay noqon doontaa muraajeceynta awooda WW soo ururinta iyo baaritaanka iyo ka warbixinta qorsheynta macluumaadka (data) gaar ahaan kormeerk (monitoring) tilmaamayaasha howl fulinta WSWP.

Marka lagu daro xoojinta EMIS, intaas waxaa dheer, marxaladda (stage) waxaa ku jiri doona abuurida qorshe shaqo ee aruurinta, howl socodsiin, baaritaan iyo jawaab bixin iyo natiijooyin **daraasad** tirokoobka (survey) labada dugsi iyo cilmi baarista kale (studies) loo bilaabay ujeedooyinka kormeerka (monitoring) horumarka WSWP.

XOOJINTA INFORMATION SYSTEM(QEYBTA XOG'OGAALKA) WAXBARASHADA EE WW.

Waaxda kormeerka iyo qiimeynta waa inay si weyn uga faa'iideystaan HMWW (EMIS) habkeeda shaqeynaya.

Haddaba UNICEF ayaa hogaamineysa hawlgalka (horumarintan) kobcinta (revitalizing) HMWW (EMIS) si ay u siiyaan qiimo kordhin (statistical input) u qalanta (relevant) waxbarashada oo la isku haleynkaro (reliable) si ay u hora mariso socodka guud ee habka waxbarashada Puntland, maadaama xoojinta howl socodka HMWW loo baahan yahay inuu yahay mid soconey, HMWW lagu kalsoonaan karo waa in la hirgaliyaa ama uu sameysan yahay 2004ka, waana in sanad kasta dib u habeyn lagu sameeyaa.

Joogteynta soo saarida war bixinta sanadeed WW. Mid KA mid ah ahdaafta shaqada (exercise) waa soo saarka jormal (Nugal) si joogto ah ee waxbixin sanadeed. Warbixin sanadeed la isku haleyn karo waa in uu siiyaa WW suurad wanagsan in shaqadu ku socoto ahdaafteedii loogu tala galay eek u cadeyd WSWP ee dhamaan heerarka habka waxbarashada oo aan u kala sareyn degaan iyo heerarka dugsiyada si jinsi ah.

Warbixin laxiriirta waxaa kamid ah:

Soo gelida iyo sinaan. Kala saaridda macluumaadka ragga iyo dumarka (sex) ee heerka ka qeyb galka (enrollment) iyo xaadiridda (attendance). Sanadka, da'da , meesha heerka iskuul ka tegidda, nooca iskuulka, fasalka, heerka guurida (transition rate).

Horjoogayaasha (caqabaadka) soo gellidda, ku negaanta (retention) iyo ka qeybgalka.

Tayada. Tan waa in ay ku jirto xogta jinsiga oo la naaqishay lagana baaraan-dagay loona kala saaray lab iyo dhedig, sida ay ugu kala baahsan yihiin gobolada, fasalada, dugsiyada, heerka aqoonta, iyo maadada, tirada barayaasha loo baahan yahay ee la qorsheyay isku aadka nisbada tirada ardada iyo bara kasta, qorsheynta tababarida shaqada ka hor iyo shaqo ku tababaridda, iyo tirada nisbada nacday ama ka baxday tababarka iyo sababta. Waxa kale oo loo baahan yahay in uu jiro diiwaan si fiican loogu qoray agabka heer kasta, tirada qolalka wax lagu barto iyo dhismayaasha kale ee la adeegsado, tirada miisaska iyo kuraasta ardada, maxsuulka waxbarashada oo lagu qiimeeyo imtixaanka dhexe ee qaranka iyo tijaabooyin kale. Kartida kormeeraha dugsiga u leeyahay indha-indhaynta iyo kormeeridda ayaa kor u qaadi karta tayada la xiriirta xogta.

Waxaa kaloo loo baahan yahay liiska diyaarka ah iyo waxtarka (adequacy) ee qalabka heerkasta ee habka siin kara tirada fasalada iyo wixii kale oo qalab lagu dhisay ah; tirada miisaska iyo kuraasta u diyaarka ah ardeyda, natiijada waxbarashada ee lagu qiimeeyay imtixaanka gobolka iyo imtaxaanada kale; xajmiga kormeerayaasha ay ku kormeerayaan, horjooge iyo kor uqaadid tayo; iyo macluumaad la xirriira .

Haboonaanta: Halkan waxa uu liishaanku saaran yahay muxtawiyaadka manhajku in uu jawaab ka bixiyo baahida waxbarashada Puntland, tayada barayaasha loo tababaray gudbinta manhajka, haynta aalad iyo qalab waxbarasho oo ku habboon, kartida Machadka Waxbarashada Puntland iyo macaahidda kale u leeyihiin, jediidinta naqshada manhajka u baahan yahay illaa iyo inta ay le'eg tahay, manhajku in uu yahay mid ku jaan go'an baahida suuqa shaqada iyo tan bulshada guud; wax qabadka qeybta barista, indha ku haynta fulinta iyo muraajacada manhajka, iyo dhinacyada kale ee manhajka markii loo baahdo.

MAAREYNTA IYO QORSHEYNTA. Macluumaadka laxiriira halkan waxaa ku jira macluumaad dib isugu celinta ragga iyo dumarka ee tirada maamulayaasha waxbarashada dugsiyada diyaarinaya maamulayaal munaasab ah iyo xirfado horjooge nimo iyo heerka/dabeecadda (extent/nature) ka qeybgalka kuwa daneynaya (**stakeholders**) goaan qaadashada waxbarashada. Sidoo kale waxaa muhim ah macluumaadka diyaar ahaant awoodda munaasaibka ah ee aruurinta, baarida, keydinta iyo isticmaalka macluumaadka waxbarashada; jiritaanka / dhaqangalka ee HMWW; dhaqangalka qorsheynta ugu yar; iyo horumarinta iyo isticmaalka qorshayaal istratigiyad leh; IWM.

Maalgalinta iyo waxqabad fiicni. Macluumaadka waa in loo ururiyaa qeybaha miisaniyadda oo ay ku xisaabtamayaan kooxaha daneynaya; iyo kharajka waxbarashada ee gobol, degmo, dugsi iyo nooca kharajka.

U howlgalka casharada kalee u qalma. Intaas waxaa la socda aruurinta macluumaadka waxbarashada ee munaasab ah kormeer barnaamijyada WSWP waa in ay taageerto daraasad hubin hadaf leh ee ku xiran baahida khaaska ah ee WW(MOE), xafiisyada waxbarashada gobolka , degmada iyo kooxaha danta ku leh ee muhimka ah. Tani waxa ay kicin doontaa daneeyayaal (stakeholders) kale duduwan oo ku xiran baahida, waxayna ahaan doontaa hawgal joogta ah.

Dib u habeynta yoolasha iyo xeeladaha. (Modification of targets and strategies)

Warbixinta WSWP howlgalkeeda qiimeyn iyo kormeer waxaa loo adeegsan doonaa in uu hago (guide) dib u habeynta ujeedooyinka iyo hanaanka wax qabadka (strategiyadda WSWP).

Qiimeyntu waxa ay hagi doontaa **howlsocodka** (process) lagu diyaarinayo miisaaniyad sanadeedka sanadka soo socda oo asaas looga dhigayo dib u qiimeyn ahdaaftii hore loo dajiyey, tilmaamayaashii, natiijooyinkii iyo dib u habeyntii barnaamijyadii iyo howlgaladii WSWP.

Miisaaniyad sanadeedka waxaa la diyaarin doonaa rubaca ugu horeeya ee sanad walba waxana ay hoos imaaneysaa hogaanka agaasimaha guud.